

Soo dhawaada

Ku dadaal adiga iyo qooyksaaguba inaad heshaan khibrad
dabaal oo amaan ah laguna raaxaysan karo.

Inta aadan galin, fadlan akhri sharciyada barkada dabaasha!

Wixii akhbaar dheeri ah, ama hadaad su'aalo qabto,
fadlan lahadal shaqaalaha xarunta

We're All in This Together

THE CITY OF
Edmonton



Waa in uu jiraa hal waalid ama qof masuul ah da'diisuna tahay 15 ama ka weeyn oo ilaaliya 3dii caruur ah oo walba oo ka yar 8 sano poolka ama poolka agagaarkiisa.

Caruur aan la kormeerayn loma ogalaan doono Pool ka.

Waalidiinta ama xanaaneeyayaashu waa ineey kuhayaan ilmaha 8 sano kayar agtooda waqti walba.

Wa inaad ogaatid meelaha biyaha u qotada dheer. Hadii aadan aqoon dabaasha, iska joog meelaha aan ku liqeenin.

Wa inaad xidhatid lifejacket logu talagalay dadka aan dabaasha si fiican u aqoon. Jaakadahaas waxaad lacag la'aan uga heli kartaan meelaha dabaasha kuyaalaan meel walba city Edmonton.

Dad cabsan (qamri ama daroogo kujirto) looma ogalo inay dhismaha soo galaan. Isticmaalka daroogada iyo Alkolada waa mamnuuc.

Waa inaad kujiirin 10 daqiiqo kabadan qololka steam ka, Saunada ama whirlpoolka si aad ubadbaado. Hadii ay jiraan wax dhibato caafimaad ama aad uur leedahada waa inaad la hadashid dhaqtarkaaga ka hor intaadan so galin meelaha dabaasha, qololka steam ka, saunada ama whirlpoolka.

Hadii ay jiraan dhibaato caafimaad (xanuunka wadnaha, qalalka iyo waxa la mid ah), u sheeg Shaqaalaha lifeguard ka ka hor intaadan biyaha galin.

Hadaad aragtid qof dhibato ay haysato, si deg deg ah waxad la socodsisa shaqaalaha ama lifeguard yada.

Ha dabaalan hadii aad qabtid cudurada faafa oo laiska qaado, ama aad xanuunsanayd, ama aad shubmeeysay labadii asbuuc oo ugu dambeeyay.

Caruurta da'dooda tahay 6 sano ama ka wayn wa inay isticmaalaan lookarada logu talagalay (Lab ama dhedig)

Haddii aad laimaato waxyaalo qaali ah sida boorso, ama fure, waxaad dhigan kartaa lookarada kuyaala meesha laga soo galo agteeda bilaa lacag.

Waxa mamnuuc ah in la qaado sawiro meelaha lagu bedesho dharka iyo musqulaha.

Cayda, falalka qatarta ah looma dulqaadanayo. Qofkaan uhogaansameeyn sharciyadan waxaa looga baahan doonaa inuu iska baxo.